

Taageerid iyo Talo

Kooxyadeena shaqaalaha waxay magangalyo-doonka iyo qaxootida siiyaan talo camali ah iyo tageero. Macamiisha waxay ka hadli karaan dhibaato walba ee la kulmaan magangalyo-doon ama qaxooti ahaan, ay ku jirto magangalyada iyo hab-socodka si gudubka, taageerida iyo waxyaabaha ay xaq u leeyihiin.

In kastoo aanan bixin talo sharciyeed, waxaan macamiisha u gudbin karnaa qareeno iyo ururyo kale oo ku caawin karo codsigooda magangalyada iyo arrimaha sharciga.

Waxaan hubinayna in qof walba u heli karo adeegyadeena. Qaxootida ku hadli karin ama ku yar yahay aqoonta afka Ingiriiska, waxaan u qaban-qaabinayna adeeg turjubaan oo waji-ka-waji ah. Mararka qaarkooda oo kani ay surtogali wayso waxaan isticmaaleyna adeegga turjubaanta telefoonka ee Language Line, sidii ay qof walba u hesho talada ay u baahan tahay.

Adeegga One- stop

Ayadoo loo maraayo adeeggeena isku jira (one stop service), waxaan bixinaynaa talo guud iyo adeegga taageerida magangalyo-doonka iyo qaxootida afarta aag ee kala firdhinta ee Wales: Cardiff, Newport, Swansea iyo Wrexham. Ayagoo ku leh aqoon deeganeed iyo xiriir ururyo kale ee aaga ku yaalo, xafiis walba wuxuu bixin doona talo gooni u ah macaamiisha ku nool magaaloyinkaas.

Shaqaalaheena waxay la xaajoonayaan Hay'adda Xudduudada iyo Hijrada iyo Taageerida Magangalyada (Borders and Immigration Agency Asylum Support) (oo horey lagu magacaabi jiray Adeegga Qaranka ee Taagerida Magangalyada - NASS) iyo hay'ado sida Job Centre Plus iyo Waaxda Shaqada iyo Hawlgabka ayagoo u hadlayaa magangalyo-doonka/qaxootida iyo waxay talo ka siinayaan taagerida/xuquuqyada ay heli karaan.

Dejinta koowaad

Waxaan talo siinnaa magangalyo-doonka mar dhow yimid oo degan dejinta koowaad ilaa uu codsigooda magangalyada iyo taageerida go'aan ka gaaro qaybta ku xilsaaran ee Home Office'ka. Dadka oo mar dhow yimid iyo dadka lagu kala firdhiyay Wales, waxaan siinna talo buuxda iyo akhbaar kooban sidi ay u fahmaan hab-socodka magangalyada, helitaanka fasalada afka Ingiriiska, daryeelka caafimaadka, guriyeynta, daryeelka bulshada iyo xuquuqda waxbarashada, tababarka iyo isku keenidda qooyaska. Waxaan xitaa ku caawinnaa markii ay dadka dhibaato la kulmaan, sida midab takoorka, dagaalka guriga ka dhax dhaca iyo diihalsanaanta.

Isku-darid

Markuu qof magangalyo-doon ah la siiyo sharciga ku noololka dalka (leave to remain) waxaan ku caawin karnaa ka gudbinta magangalyo-doonka una gudbinta qaxootinimo. Caadi ahaan, waxaa kani loola jeedaa in lagu caawin doono talo iyo taagerid arrimo baaxad badan leh ay ku jiraan guriyeynta, kaalmada (ceyrta), shaqada, koronto/gaas/telefoon, helidda alaabta guriga la dhigto, helidda dokumentiga socdaalka iyo isku keenidda qooyaska.

Waxaan deegaan walba la shaqeynaa hay'ado aan lamaano nahay waxaana ku dadaalnaa inaan hubino in adeegyada waa-weyn wax ka qabtaan baahida magangalyo-doonka iyo qaxootida.

Go'aamada Diidmada ah

Dadka ka helay xafiiska Wasaaradda Gudaha (Home Office) go'aan diidmo ee ugu dambeys ah, waxaan ku caawin karnaa inaan u helno meel ay degaan, cunto ka cunaan, ku qubeystaan iyo dharkooda ku dhaqdaan. Caawinaaddaan wuxuu ku xiran yihiin marba haddii adeegyadaan ay

xaafadda ka jiraan. Waxaan dadka si gooni baylaha u ah ku caawin karnaa caawinaad maaliyadeed oo xadeysan annagoo isticmaaleyno Hardship Fund.

Xafiisyadeena

Cardiff
Phoenix House
389 Newport Road
Cardiff CF24 1TP
Tel:029 2048 9800
Fakis: 029 2043 2980

Initial Accommodation Team
Lynx House
385 Newport Road
Cardiff
CF24 1RN
Tel: 029 2048 0150
Fakis: 029 2047 1592

Newport
High Street Chambers
51 High Street
Newport NP20 1GB
Tel: 01633 266420
Fakis: 01633 266421

Swansea
Third Floor Grove House
Grove Place
Swansea SA1 5DF
Tel: 01792 630180
Fakis: 01792 630181

Wrexham
Trinity House
Trinity Street
Wrexham LL11 1NL
Tel: 01978 367890
Fakis: 01978 367891